



Damian Lillard wuxuu IXTIRAAMKA kaga hadlay Roosevelt

Booqosho uu xiddiga kubadda kolayga ee Portland Trail Blazers ee Damian Lillard ku yimid ayaa wuxuu taageero ka geystay bilowga sanad dugsiyeedka cusub ee Dugsiga Sare ee Roosevelt. Lillard wuxuu ka soo muuqday kulankoodii ku soo laabashada dugsiga wuxuuna u fidiyay taageeradiisa, isaga oo ardayda u sheegay in mararka qaarkood wax walbaa yahay imaanshaha.

Ka dib markii laga reeyay cayaar muhiim ahayd markii uu dhallinyarada ahaa, Lillard wuxuu sheegay, rajadu waxay ahayd in ciyaartooydu ay maalin fasax ah qaadan doonaan. Taasi ma yeelin Lillard. Wuxuu ahaa ciyaaryahankii kaliya ee ku soo laabtay tababarka maalintii xigtay.

“May ahayn in aan imaado maalintaas, laakiin waxaan ballanqaad u sameeyay tababaraha in aan halkaasi imaan doono, sidaasi darteed waan imiday,” ayuu sheegay Lillard. “Waan dhowray balantaydii aan u qaaday isaga.”

Sanad kasta tan iyo markii uu ku biiray Blazers 2012-kii, Lillard wuxuu doortay laba ama saddex dugsi oo ku yaala meelaha magaalada ah ee Portland si la iskugu diiwaangeliyo [barnaamijkiisa IXTIRAAM](#), kaasi oo ah tallaabo loogu talagalay guud ahaan dugsiga oo lagu dhiirigeliyo ardayda si ay fasalka u yimaadaan waqtiga loogu talagalay, si adag u shaqeeyaan isla markaana ixtiraamaan macallimiintooda, ardayda ay wada dhigtaan iyo naftoodaba.

Ujeedada barnaamijka IXTIRAAM "RESPECT" waa in uu wanaajiyo imaanshaha guud ahaan dugsiga iyo heerarka qalin-jabinta isaga oo ardayda siinaya abaalmarino loogu talagalay shaqada wanaagsan ee ay qabtaan. Ardayda buuxisa marxalado gaar ah oo loogu talagalay GPA iyo imaanshaha dugsiga waxaa loo gelin doonaa bakhtiyaanasiibka loogu talagalay kabaha, tigidhada cayaaraha Blazers iyo qalabka kale. Lillard wuxuu masraxa keenay saddex ka mid ah ardayda wax qabadkoodu sareeyo ah wuxuuna siiyay boorsooyinka sidaha leh.

Maamule Filip Hristic ayaa bilaabay kulanka, isaga oo hadafkiisa iyo rajadiisa la xiriirta sanad dugsiyeedka cusub la wadaagay ardayda -- taasi oo ah in dhammaan ardayda, iyada oo aan la eegayn asalkooda, jinsigooda, waxay isku aqoonsan yihiin, dookhooda galmo ama xaaladooda deganaansho la soo dhaweynayo isla markaana loo mahad celinayo. Goobta jimicsiga waxaa hal mar ka yeeray sawaxan markii uu dhahay: “Waxaan rabaa in aad ogaataan in nolosha dadka madow ay muhiim tahay isla markaana xaaladaada deganaanshana aanay ahayn mid dhibaato leh!”

Lillard wuxuu ku soo gebagabeeyay kulanka iyaga oo u sheegaya ardayda in uu rajeynayo in aysan khibradooda dugsiga sare u qaadan mid hadal la'aan lagu helayo.

“Waxa ugu fiican ee aan dhammaantiin idin siin karo waa in aad wakhti fiican qaadataan,” ayuu sheegay Lillard. “Ku raaxaysta ahaanshaha ardayda dugsiga sare. Midba midka kale ha xiiseeyo.”